



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 30, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Qaadista Xayiraadaha COVID-19 ee ODDS

Sida aan ku tilmaamay [farriintaydii Juun 24-keedii](#), ODDS waxay isku diyaarinaya ku dhawaaqista Guddoomiyaha gobolka ee Kate Brown ee qaadista inta badan xayiraadaha la xiriira COVID-19.

Juun 30, Guddoomiyaha gobolka ayaa qaaday xayiraadahaasi. Laga bilaabo Luulyo 1, ODDS waxay isbeddelo ku sameynaysaa shuruudaha looga baahan yahay daryeel bixiyayaasha, hay'adaha maamulka kiiska, iyo ruqsad bixiyayaasha, iyada oo mid kasta oo ka mid ah tani ay saameyn ku yeelanayso dadka helaya adeegyada iyo qoysaskooda. Faahfaahinta siyaadaha la cusbooneysiisay ee ODDS waa farriin la gudbinayo [\(LINK\)](#). Dhammaan [buuga shaqaalaha ee hadda jira ee COVID-19](#) ayaa sidoo kale la cusbooneysiiyay.

Halkan waxaa ku qoran waxyaabaha ugu muhiimsan ee isbeddelada dhanka siyaasada:

- ODDS waxay qaadaysaa shuruudaha maaskaraha ee loogu talagalay guriga-dhexdiisa, ilmo korsiga, iyo daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay, iyo sidoo kale shaqaaleynta fool ka fool ah iyo taageerada hawlaha maalintii (DSA). ODDS waxay kula talineysaa daryeel bixiyeyaashu in ay sii wataan xirashada maaskaraha, gaar ahaan haddii dadku yihiin kuwo aan la tallaalin ama difaaca jirkoodu liito, balse hadda ka dib loogama baahnaan doono goobahani.
- Maaskaraha waxaa looga baahnaan doonaa shaqo kooxeedka iyo adeegyada kooxda ee DSA, marka laga reebo DSA kooxda ee lagu qabto bannaanka.

- Dadka ka tirsan adeegyadu waxay daryeel bixiyahooda ka codsan karaan in uu sii wado xirashada maaskaraha xataa ka dib marka la qaado xayiraadaha.
- Qaar ka mid ah adeegyada maamulka kiiska ee shakhsi ahaaneed ayaa dib u bilaabmi doona, oo ay ku jiraan kormeerka sanadlaha ah.
- Ruqsad bixinta shakhsi ahaaneed iyo ku soo wareega guryaha la degan yahay (ilmo korsiga iyo guryaha koox ahaanta loo degan yahay) ayaa dib u bilaabmi doona.

Waad ku mahadsan tahay wax kasta oo aad sameynayso si aad u xaqiijiso caafimaadka iyo ammaanka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.